

**Waxaad** maxkamadda gayn kartaa kiraystahaaga haddii aad ku leedahay kiro ama ay jebiyaan heshiiskooda, laakiin ma **awoodid**:



Inaad beddesho qufullada si ay u baxaan



Inaad damiso adeegyadooda (nalka, biyaha, gaasta)



Inaad alaabtooda wadadda dhigto ama ka saarto guriga.

**Haddii aad mid ka mid ah kuwan samayso ka hor intaadan maxkamadda aadin, kiraystahaagu wuu ku dacwayn karaa.**

## Samee Dayactirka



Waa inaad dayactirtaa waxyeelada aysan si kas ah u keenin kiraystahaaga ama martida kiraystayaasha. Adiga ayaa mas'uul ka ah in aad dhismuhu noqdo mid fiican oo shaqaynaya.

Waa inaad bixiso kuleyliyaha iyo qalabka korontada shaqeeya. Uma baahnid inaad bixiso kharashka adeegyadda, laakiin waa inaad hubisaa inay shaqeeyaan.

U hoggaansan dhammaan xeerarka dhismaha iyo guryaha. Oogsoonow, xeerarka xad gudubka waa xoggo dadweyne!

Ilaali meelaha lagu badan yahay. Dhismooyinka leh 4 hoy ama wax ka badan, waa inaad keento weelasha qashin qubka.

## Raac Nidaamyada



Kireestaha ha ka qafilan guriga adiga oo aanad maxkamad u soo marin. Inaad Samayso ama ku hanjabtid inaad sameyn doonta guri ka saarid waa sharci-darro ah oo kiraystahaagu wuu ku dacwayn karaa!

Lacagta debaajiga waa inaad galiso koonto gaar ah. Keen liis qoran oo ay ku qorantahay waxyeelada la helay 30 maalmood gudahooda ee kiraystuhu ka guuray.

## Ixtiraamka Xuquuqda Kiraystaha



Ilaali xuquuqda gaarka ah ee kiraystahaaga. Waa in aad bixisid ogaysiis ka hor inta aanad galin guriga, oo waxa kaliya oo aad gali kartaa sababo gaar ah marka ay jiraan.

Ha takoorin kireystayaasha. Raac shuruucda ku xusan Xeerka Guryaha loo siman yahay iyo Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Tennessee.

Ha dhibin kiraystayaashaada. Sida in si sharci darro ah loo galo guriga ama laga xirto.

**Kuwani waa aasaaska! Akhri sharciyada gobolka si aad u aragto mas'uuliyadaha kale.**

# MASUULIYADAAH KIRAYSTAHA

**Kireysteyaasha:  
Ogoow Xuquuqdaada!**

Mulkiilahaagu maxkamad buu ku gayn **karaa** haddii laguugu leeyahay kiro ama aad jabisay heshiiskaaga, laakiin **ma awoodo**:



Inaad beddesho qufullada si ay u baxaan



Inaad damiso adeegyadooda (nalka, biyaha, gaasta)



Inaad alaabtooda wadadda dhigto ama ka saarto guriga

## Haddii ay taa kugu dhacdo, wac waaxda la Talinta Guri ka Saarida

### Bixi Kiradda



**Bixi kirada wakhtigeeda.** Iyada oo loo eegayo heshiiskaaga, waxa laga yaabaa in aad haysato wakhti dheeraad ah oo shan maalmood ah ka hor inta aanu mulkiiluhu kugu dalacin lacag dib u dhacday ama aanu ku saarin.

**Bixi kirada xitaa haddii dayactir la samaynayo.** La hadal qareenkaaga inta aadan lacagta kirada u hakin dayactirka. Taasi waxa ay kaa dhigi kartaa qof u nuqul in guriga lagaa saaro.

**La xidhiidh mulkiilahaaga.** Inaad u sheegto mulkiilahaaga inaad kala daahday kiradaada cabsi bay leedahay, laakiin inaad u sheegin arrimaha bay kasii dari!

### U Hogaamsam Heshiishka



**Raac shuruucda heshiiskaaga.** Haddii aad moodo in qaybo ka mid ay yihiin kuwo "aan la fulin karin" ama sharci-darro, la hadal qareen.

**Ha u oggolaan dad aanan heshiiska ku jiran inay guriga degaan.** Sidoo kale, raac qodobadda heshiiskaaga ee xaddidaya martida kula joogaysa.

**Noqo jaar wanaagsan.** Xusuusnow, tani waa gurigooda!

**U sheeg mulkiilahaaga haddii aad maqnaanayso in ka badan toddobaad.** Haddii aadan sidaa samayn, ywaxaa laga yaabaa inaad si lama filaan ah uga tagayso gurigaaga!

### Ilaali Hantidda



**Ilaali nadaafada gurigaaga iyo meelaha la isla wadaago.** U sheeg mulkiilahaaga, haddii aad aragto caaryo ama cayayaan.

**U sheeg mulkiilahaaga marka gurigu u baahan yahay dayactir.** Waxa had iyo jeer fiican inaad qoraal ahaan ugu sheegto!

**Waxyeelo ha u geysan guriga.** Adiga ayaa ka masuul ah waxyeelada guriga soo gaara aanan ahayn waxyaabaha caadiga ah sida jeex jeexa.

**U oggolow mulkiilahaaga inuu galo guriga.** Waa inaad sidoo kale mulkiilaha siisaa fure koobi ah haddii ay ku codsadaan mid.

**Kuwani waa aasaaska! Akhri sharciyada gobolka si aad u aragto mas'uuliyadaha kale.**



(833) 837-HOME



SOMALI - Landlord/Tenant

(615) 701-7957



(615) 988-6460



ROOFTOP  
NASHVILLE

Macluumaadkan waxaa loogu talagalay oo keliya Degmada Davidson. Macluumaadka halkan lagu bixiyay maaha oo looguma talagelin inay ka dhigaan talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, fadlan wac qareen gaar ah ama wac Ururka Gargaarka Sharciya ee deegaankaaga ee Middle Tennessee iyo xafiiska Cumberland 1-800-238-1443 ama Ururka Nashfiil Hisbaanik Bar 1-615-701-7957. Dib loo eegay 5/24.